Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Aan kala Cadeyn:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

**Elevated CK-MM, Family Fact Sheet—Somali**

# CK-MM Sareeya

## Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay kadib dhalashada ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu qabo heerarka sareeya ee xanuunka murqaha oo la yiraahdo creatine-kinase (CK-MM).

## Maxay tani ka dhigan tahay?

CK-MM heer sareeya ah oo laga helo sanbalka baaritaanka ilmaha dhashay kadib dhalashada ayaa mid badanaa dhaca waxaana inta badan keenaaya hanaanka dhalashada ee caadiga ah. Tan ayaa si gaar ah u dhacda haddii ilmuhu soo maray fool dhib badan, dhaawac, la gashay NICU, ama baaritaankiisa ilmaha dhashay xili hore la sameeyay. Marka ay sidaan jirto, CK-MM ayaa caadi noqda muddo kadib.

Marar dhif ah, natiijada baaritaankaan ayaa la xiriirta cilad dhanka murqaha ah, sida xanuunka murqo qalooca ee Duchenne (DMD) ama xanuunka murqaha ee Becker (BMD). CK-MM ayaa la filayaa inuu sii ahaado mid sareeya muddo kadib shaqsiyaadka qaba midkood xanuunada soo socda ee murqaha.

## Maxaa xiga oo dhici kara?

Inkasta oo aysan u badnayn in ilmahaagu qabo DMD/BMD, baaritaan dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo hubiyo.

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa ku celin doona baaritaanka ilmaha marka ilmuhu gaaro labo asbuuc jir. Inta badan baaritaannada ku celiska ah ayaa soo sheega natiijooyin caadi ah loomana baahdo baaritaan kale.

Haddii CK-MM wali sareeyo, dhakhtarka ilmahaaga ayaa diyaarin doona baaritaan dheeraad ah oo ay sameeyaan taqasusleyaal aqoon u leh xanuunnada murqaha.

## Maxaa ilmaha dhashay looga baaraa DMD/ BMD?

DMD iyo xanuunka fudud ee la xiriira oo la yiraahdo BMD waa xanuunada murqaha oo ilmaha lagu arko sanadaha koobaad. Waxay keenaan daciifnimada daran ee murqaha iyo luminta murqaha muddo kadib. Xanuunadaan ayaa caadiyan saameeya ragga, ayagoo dumarku inta badan aysan lahayn ama ay ku yar yihiin ciladaha xanuunku.

DMD/BMD lama dawayn karo, laakiin caawimaada xili hore ayaa gacan ka gaysan karta yareynta xanuunka iyo hagaajinta tayada nolosha.

## Dhigaalada

**Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:** http://ghr.nlm.nih.gov

**Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:** www.savebabies.org

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:** www.babysfirsttest.org

**Halkaan iskaanka mari si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka ilmaha dhashay ee Minnesota ama booqo webseedkeena oo ah:** www.health.state.mn.us/people/newbornscreening

DEPARTMENT OF HEALTH

Barnaamijka Baadhitaanka Dhallaanka Cusub ee Minnesota (Minnesota Newborn Screening Program) | www.health.state.mn.us/newbornscreening
P.O. Box 64899, St. Paul, MN 55164
Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale:
La xiriir health.newbornscreening@state.mn.us
ama wac (800) 664-7772 ***turjubaano ayaa la heli karaa***

DIB-LOO-EEGAY 2/2025